



DUGSIYADDA GUUD EE PORTLAND Young Women's Leadership Academy At Harriet Tubman

2231 N. Flint Ave.
Portland, OR 97227
503-916-5630

Deyrta-Guga 2012

The Young Women's Leadership Academy at Harriet Tubman waa dugsiga keliya ee gabdhaha ee dugsiyadda guud ee Oregon.

Howladeenadu waxa ay bixiyaan barnaamij gaadh ah, xagga akadeemiyada qani ah islamarkaana caawinaya gabdhaha yaryar ee fasaladda 6 illaa 12 ee xisaabta, sayniska, technology iyo hogaanka. Waxaanu garowsanahay in uu jiro horumar la taaban karo iyo baahida akadeemiyadeed ee hablaha, waxaanu dadaal ugu jirnaa horumarinta xirfadda hogaanka ee khusuusiga ah ee mid walba oo ka mid ah ardaydeena.

Ardayda YWLA waxa ay ka yimaadaan Dugsiyadda Guud ee Portland iyo degmooyinka ka baxsan xuduuda PPS. Ururka ardaydu waa soo dhaweeye kala isir duwan, oo waxa uu matalaa isiro iyo luqado kala duwan. Ardaydu waxa ay ka helayaan fasalo ardaydoodu tira yartahay kuwan oo xidhiidh xoogan leh macalimiintooda ku xidhan. Xarunta YWLA waxa ay ku taalaa Wuqooyiga Portland, waxaana taga gaadiidka dadwaynaha waxay sidoo kale dhinaca ku haysaa mid ka mid ah dariiqyadda waawayn.

"Awooda dugsiga gabdhuhu waa in gabdhuhu ay yihiin muhandisiinta mustaqbalka, macalimiinta, cidhbixiyeenadda, qareenadda, dhakhtaradda, iyo hogaamiyayaasha tub walba oo suuragal ah. Gabdhuhu waxa ay sameeyaan halkan waxa ugu wanaagsan ee ay sameeyaan: Aflaxa" **Bonnie Hobson, YWLA Maamulaha**

Macluumaadka maadada

Xisaab/Saynis/Technology-ga

Dugsiga Dhexe: Ardayda oo dhan waxay qaadanayaan sayniska labaad, xisaab, ama maadada technology-ga sida kuwa ay isaga darsan karaan.

Dugsiga Sare: Ardaydu waxay codsanayaan sayniskooda, xisaab iyo xirfadda technology ee fasaladeena cilmi baadhista. Ardaydu waxay qaadan karaan fasalkan saacadaha kuliyadaha ee Portland State University marka Igu daro saacadahooda dugsiga sare.

Hogaanka, Kuliyadda iyo Diyaarinta Shaqadda

- Daraasad todobaadle ah ayaa siinaysa fursadaha mashaariicda adeegyadda beesha ee hay'adaha maxaliga ah
- Ardayda heerka labad ayaa ka qayb qaadanaya martigelin xagga shaqadda ah hadba wixii ay danaynayaan
- Ardayda dugsiga oo dhan waxay ka qayb qaadan karaan tababaradda hogaanka ee iskaa wax uqabso ee Mercy Corps
- Dhamaan ardayda waxay helayaan fursad ay oga qayb qaataan diyaartinta kuliyadda iyo maadooyinka diyaargarowga.

Maadooyinka kale

- Ku meelaynta maadooyin horumarsan ama isudiwaangelinta fasalo kala duwan ee Portland Community College
- Horudhaca Biomedical Engineering, Digital Electronics, Robotics, Hogaanka iyo Horumarinta Shaqadda

"Ardayda YWLA way u xamaasaysanyihiin xisaabta iyo Handasadda. Waxay ka qayb qaataa darasadda, waa ardayda kala asal iyo isir duwan, waa wax caadi ah halkan in lakala duwanaado, waa iska caadi in aad noqoto daafuur" **Cal Jackson, teacher**

Macluumaadka Dugsiga

2011-12 isdiwaangelinta: 171

Waxyaabaha uu la goonida yahay YWLA

- Akadeemiyadda ardayda oo loo gooni yeelay bii'ad barasho halka ay ardaydu ka helayaan fursadaha nashaadka manhaj dheeri ah iyo ciyaaraha.
- Dugsiga dhexe iyo sare oo xaran keliya ku yaala. Horumarka ardayda illaa maadooyinka dugsiga sare inta ay ku jiraan sanadaha dugsiga dhexe kolka ay xagga akadeemiyadda diyaar ka yihiin, dugsiga oo oga dhigan goob soo jiidasho leh bartayaasha degdega ah.
- Akadeemiyadda oo si toos ah usaamaynaysa hogaanka, xisaabta, sayniska iyo handasadda.
- Wadayntadda ururo dhowr ah ayaa tayeynaya manhajka islamarkaana siinaya ardayda fursado ay shaqo ku doontaan, kuliyadaha iyo danahooda gaadhka ah
- Dhamaan ardayda YWLA waxay xidhaan lebis gaadh ah.

- Jadwalka laba maalmood todobaad walba ayaa siinaya waqti barasho la kordhiyey, cilmibaadhis iyo tayeynta maadooyinka oo dhan.

“Macalimiintu waxay danaynayaan ardaydooda waxayna si adag isugu dayayan in ay gaadhaan baahidoda, fasaladda intooda badanna sidaa uma wayna, sidaa awgeed waxaad heli kartaa waqti dheeri ah oo aad macalinka la qaadato.” – Charm Lomax, 13

Ciyaaraha fudud, Jimicsiga, iyo Tayeynta Nashaadka

- Kubadda Gacanta dugsiga dhexe
- Kubadda laliska dugsiga dhexe
- Ciyaaraha dugsiga sare (ee dugsiyadda sare ee xaafadda)
- Bike safety
- Yoga
- Self-defense

“Dugsigani waa uu ka duwanyahay dugsiyadda kale. Xooga waan saari karaa waxbarashadayda waayo wiilal ma joogaan halkan” – Yatziri Garcia-Flores, 13

Waxbarashadda la kodhiyey

- Student Government
- Lego Robotics
- Strings (orchestra ensemble)
- Adventure Club
- Exercise/fitness
- Drama
- Tutoring
- Homework Club
- Battle of the Books
- Weekly math and vocabulary challenges
- Dance
- Newspaper Club
- Spelling Bee
- Leadership
- OSU Nutrition
- Project Lead the Way
- Upward Bound
- MESA (Math, Engineering, and Science Achievement)

“Fasaladeena handasadda, qof innaga mid ah oo qabay fikirka in uu muhandis noqonayo ma jirin, laakiin macalinka nagu dhiiri geliyey oo nagula dhinac tamay in aanu ku fekirno wujhadda” – Shradha Pulla, 16, sanadkan ayay qalinjebinaysaa si ay uqaadato shahaado muhandisnimo

“qoyskeena waxay usoo guureen Portland sidaa awgeed ubadkaygu ma aysan dhigan karin dugsigan. Waxaa nasoo jirtay kala duwanaanshaha iyo furfurnaanta YWA. Ma jirto kal qaybsanaan xagga dhaqanka iyo heerka. Gabdhaha oo dhan way iscaawinayaan, ka qayb qaadashadda waalidkuna halkan way xoogantahay. Dugsi kan la mid ah Portland kuma yaalo.” Jyothi Pulla, Shradha’s Hooyo

Baro dugsiga:

Xiliyadda macluumaadka Feb. 14, 15, 28 iyo 29 iyo March 13 saacadda 6 fiidnimo dugsiga, 2231 N. Flint Ave.

Macluumaad dheeri ah oo la xidhidha the Young Women’s Leadership Academy waxaad ka heli kartaa aqalka dugsiga: www.pps.net/schools .

Si aad ucodsato YWLA booqo www.SchoolChoice.pps.k12.or.us si aad urogoto codsiga February 2012 inta lagu jiro xiliga bedelka, Feb. 3-29 dugsiga sare, Feb. 10-March 9 dugsiyadda dhexe.

Dugsiyadda Guud ee Portland waa fursad shaqaaleyn iyo barasho loo simanyahay.

